

Ilaali maalgashiyada Muhiimka ah ee Daryeelka Carruurta & Waxbarashada Hore

Nidaamka daryeelka carruurta ee Washington waa mid adag, oo ah kaabe bulshada ay wado kaas oo u oggolaanaya waalidiinta inay shaqeeyaan, carruurta inay helaan waxbarashada hore ee cayaarta ku saleysan iyo dhaqaalaha inuu kobco. La'aanteed, loo shaqeeyayaasha gobolkeennu kuma tiirsanaan karaan shaqaalaha kuwaas oo ah waalidiin oo carruur badan ayaa imaan doonta dugsiga xannaanada carruurta iyaga oo aan diyaarsanayn.

Sidee ayuu cudurka safmareenka ah u saameeyey daryeelka carruurta?

- Ilaa 24% ee barnaamijyada daryeelka carruurta ayaa xirmay, qaarkoodna si joogto ah
- Kharashyada ku baxa barnaamijka daryeelka carruurta ayaa kordhay sababo la xiriira tirada kooxaha oo yaraaday iyo baahida loo qabo nadaafada oo korortay
- Qoysaska qaba ardeyda da'da iskuulka ah waxay ku tiirsan yihiin adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta si ay u daryeelaan carruurtooda gacana uga geystaan baahidooda waxbarashada khadka tooska ah
- Carruurta yaryari waxay la kulmayaan jahwareer la xiriira cudurka safmareenka ah, taasoo kordhinaysa baahida loo qabo taageerooyinka caafimaadka maskaxda
- Adeeg-bixiyeyaasha kordhinaya tayada barnaamijka iyagoo bixinaya tacliinta sare waxay ka walaacsan yihiin in deeqaha waxbarasho ay dhammaan doonaan
- Daryeelka aan rasmiga ahayn, ee ay bixiyaan qoysaska, asxaabta iyo deriska, ayaa kordhay maadaama barnaamijyada shatiga leh la xiray oo dugsiyada K-12 waxay bixiyaan oo keliya waxbarashada khadka tooska ah.
- Qoysas badan oo la soo deristay hoy la'aanta ayaa raadinaya caawimaad dhanka raadinta daryeelka carruurta ah

Hase yeeshe in kasta oo daryeelka carruurta door muhiim ah ka caayaaro nooloshu qoysaska badankood, haddana inta badan laguma taageero maalgalinta dadweynaha, si ka duwan nidaamka waxbarasho ee K-12. Taa badalkeed, nidaamkeena daryeelka carruurta waa inuu ku tiirsanaadaa waalidiinta da'da yar, kuwaas oo caadiyan dhaqaalaha hooseeyo oo aan haysan hanti badan, si loo maalgeliyo. Tani waxay sharraxaysaa sababta macalimiinta dugsiyada xannaanada carruurta ay u shaqeystaan lacag yar – wax ka yar lacagta ay helaan kuwa ka shaqeeya goobta gaariyaasha la dhigto iyo kuwa xanaaneeya xayawaannada rabaayadeysan.

Maalgelinta WA ee yar ee nidaamka daryeelka carruurta ay helaan, oo ah in ka yar 1% ee miisaaniyadda gobolkayaga, ayaa gabi ahaanba lama huraan ah. Dhimista miisaaniyada waxay sababi doontaa barnaamijyo badan oo daryeelka carruurta ah inay xirmaan, maadaama aan ugu baahanahay si ka daran sidii hore inta aan isku dayayno inaan dib u dhisno dhaqaalaha markuu yimaado tallaalada COVID-19.

Barnaamijka Child Care Aware ee Washington wuxuu adeeg-bixiyeyaasha ka caawinaayay in albaabadda sii furnaadaan iyagoo bixinaya tababar macmal ah oo ku saabsan wax kasta laga bilaabo sida wax looga beddelayo goobaha waxbarashada carruurnimada si gacan looga geysto kala fogaanshaha jireed ee bulshada, iyo ku xiridda ilaha taageerada dhaqaale, iyo bixinta agabyada muhiimka ah sida tiishka musqusha iyo bilijka. Xarunteena Qoyska waxay ka caawinaysay qoysaska inay helaan barnaamijyada daryeelka carruurta ee furan ee u dhow iyo inay ku xiraan kheyraadka kale markii loo baahdo.

Kaalmooyinka loogu talagalay barnaamijyada daryeelka carruurta iyo qoysaska qaba carruurta yaryar waxay noqdeen kuwo aad u sii muhiim ah intiiba ay dhibaatooyinka aafadu ay sii socdeen. Maalgashiga Washington ee daryeelka carruurta waa in la joogteeyaa.



Barnaamijka Child Care Aware ee Washington wuxuu sharci dejiyeyaasha ugu baaqayaa inay mudnaanta siiyaan daryeelka carruurta ayna ilaaliyaan maalgashiyada muhiimka ah ee nidaamkeena daryeelka carruurta uu ku tiirsan yahay:

- 1 Joogteynta maalgalinta tababarka Early Achievers si markaa barnaamijyada daryeelka carruurta ay u helaan taageerada shaqsiyeed ee ay ugu baahan yihiin si ay uga gudbaan cudurka safmareenka ah
- 2 Xaqiijinta in Xarunta Daryeelka ee Barnaamijka Child Care Aware ee Washington ay sii wadi karto buuxinta baahida sii kordheysa ee qoysaska raadinaya daryeelka
- 3 Sii wadidda hirgelinta la-talinta caafimaadka maskaxda ee dhallaanka iyo carruurta, oo ay ku jiraan la-talinta daryeelka carruurta
- 4 Ilaalinta deeqda waxbarasho ee carruurnimada hore taas oo loogu talagalay xirfadleyda daryeelka carruurta
- 5 Ilaalinta iyo wanaajinta Xiriirka Shaqada Daryeelka Carruurta Muddada Guri La'aanta (Working Connections Child Care Homeless Grace Period)